

FURAHA MUSTAQBALKA IT

Hagaha Dhalinyarada Ee Xirfadaha Dijitaalka

QORAAGA BUUGA

HUSSEIN ABDIRAHMAN, B.S.

HIBEYN

Buuggan Furaha Mustaqbalka IT waxaan u hibaynayaa hooyaday iyo aabbahay qaaliga ah ee dunida ka geeriyooday Iyaga ayaan ka dhaxlay adkaysi, dulqaad, iyo rabitaanka inaan nolol sharaf leh dhisto.

Buuggan waxaan kalo hibeeyey dhammaan dhalinyarada Soomaaliyeed, gaar ahaan kuwa leh riyooyn waaweyn balse aan weli helin jihadii saxda ahayd.

Waxaan u hibeynayaa qof kasta oo doonaya inuu aqoonta IT u adeegsado horumarinta naftiisa, qoyskiisa, iyo bulshadiisa, kana dhigo mid uu kaga baxo jahawareerka una galo mustaqbal ifaya.

Sidoo kale, buuggan waxaa aan u hibeynayaa arday kasta oo niyad jab la kulmay, balse wali rumeysan in isbeddel dhab ah uu ka bilaabmo hal go'aan iyo hal tallaabo oo sax ah.

Ugu dambayn, waxaan u hibeynayaa qof kasta oo rumeysan in aqoontu tahay furaha horumarka, isla markaana diyaar u ah inuu maanta bilaabo, halkii uu berri sugi lahaa.

MAHADNAQ

Mahad oo dhan waxaa iska leh Alle Subxaanahu Wa Tacaalaa, kaas oo na siiyey caqli, awood, iyo fursad aan ku baranno aqoon faa'iido leh, kana dhigno mid aan ku horumarinno nafteena iyo bulshadeena.

Waxaan mahad gaar ah u dirayaa waalidiintay, kuwaas oo igu garab istaagay ducado, dhiirrigelin, iyo hagd joogto ah. Taageeradooda iyo samirkooda la'aantood, buuggan ma noqon lahaa mid hirgala.

Waxaan sidoo kale mahad u jeedinayaa macallimiintayda iyo dhammaan dadka aqoonta igula wadaagay jidkayga waxbarasho, kuwaas oo iga caawiyay fahamka IT, dhiirrigeliyana horumarka maskaxeed iyo mid xirfadeed. Waxaan sidoo kale mahad u jeedinayaa my bro Dr Abdihakim mohamed

Mahad gaar ah ayaan u dirayaa dhalinyarada Soomaaliyeed, kuwaas oo ah sababta ugu weyn ee buuggan loo qoray. Rajadaydu waa in buuggan uu noqdo mid idin iftiimiya jidka mustaqbalka, idinkana caawiya inaad IT uga dhigtaan fursad, shaqo, iyo adeeg bulsho.

Ugu dambayn, waxaan mahadnaqayaa qof kasta oo buuggan akhriya, faafiya, ama ka faa'iideysta, anigoo rajaynaya

in aqoonta ku jirta ay noqoto mid wax ku biirisa noloshiisa iyo tan bulshada guud ahaan.

Haddii buuggan uu qof keliya ku dhiirrigeliyo inuu bilaabo barashada IT ama uu riyo u rogo ficil, markaas dadaalkaygu miro buu dhalay.

TUSMADA BUUGA

FURAHA MUSTAQBALKA IT	1
QORAAGA BUUGA	2
HIBEYN	3
MAHADNAQ.....	4
HORDHAC.....	12
CUTUBKA 1AAD.....	15
IT & Mustaqbalka Dhalinyarada.....	15
Dhalinyarada iyo Isbeddelka Dunida.....	15
Waa Maxay IT Doorka Uu Ku Leeyahay Mustaqbalka?	16
Sababta Dhalinyarada Uga Baahan Yihiin IT	17
Cabsida iyo Khaladaadka Dhalinyarada	18
IT & Mustaqbalka Dhalinyarada.....	19
Tusaalooyin Nolosha Dhabta ah	20
IT & Isbeddelka Maskaxda Dhalinyarada	22
Khaladaad Ay Dhalinyaradu Sameeyaan (Iyo Sida Loo Saxo) 22	
Farriin Toos ah oo Akhristaha Loo Dirayo	23
Gunaanad Cutubka 1aad	23
CUTUBKA 2AAD.....	24
Waa Maxay IT? Fahamka Aasaaska Teknolojiyadda	24

Macnaha IT (Information Technology).....	24
IT Maaha Kaliya Computer	25
Qaybaha Ugu Waaweyn ee IT	26
Hardware	26
Software	26
Networking	26
Data & Information	27
IT vs Computer Science (Farqiga u Dhexeeya)	27
Sida IT Ugu Shaqeeyo Nololmaalmeedka	28
Tusaalooyin Dhab ah (Real Life Examples).....	28
Tusaale 1: Dukaanka Yar.....	28
Fahamka IT ee Dhalinyarada (Maskaxda Saxda ah)	29
Khaladaadka Bilowga	29
IT Ma Adiga Ayuu Kuu Habboon Yahay?	29
Gunaanad Cutubka 2aad.....	30
SUAALO IYO JAWABO MUHIIM AH.....	30
CUTUBKA 3AAD.....	33
QALABKA IYO AQOONTA ASAASIGA AH EE IT	33
Waa Maxay Qalabka IT?	35

Aqoonta Aasaasiga ah ee Qof Walba u Baahan Yahay	38
Sheeko Dhiirrigelin ah	38
SU'AALO IYO JWAABO	38
Gunaanad Cutubka 3aad	41
CUTUBKA 4AAD.....	42
XIRFADAHA IT EE MUSTAQBALKA	42
Waa Maxay Xirfad IT?	42
Sababta Xirfadaha IT Mustaqbal u Leeyihiin.....	43
Programming Code	43
Web Development	44
Graphic Design & UI/UX.....	44
Cyber Security.....	44
Data & Artificial Intelligence (AI)	45
Digital Skills & Online Work	45
Sheeko Dhiirrigelin ah	46
SU'AALO IYO JAWAABO MUHIIM AH.....	46
CUTUBKA 5AAD.....	49
SIDA LOO BARTO IT QORSHE, JOOGTEYN & HIRGELIN	49
Maskaxda Saxda ah (Right Mindset)	49

Tallaabooyinka Aasaasiga ah ee Barashada IT	50
Qorshe Barasho 90 Maalmood ah (Bilow Tusaale)	50
Sida Waqtiga Loo Maareeyo	51
Caqabadaha Caadiga ah & Sida Loo Ka Gudbo	52
Sheeko Dhiirrigelin ah	52
SU'AALO IYO JAWAABO MUHIIM AH.....	52
CUTUBKA 6AAD.....	56
SHAQO IYO DAKHLI IT FREELANCE, ONLINE & FURSADO CASRI AH.....	56
Waa Maxay Shaqo IT?	56
Noocyada Shaqo IT	57
Freelancing Waa Maxay?	57
Sida Loo Bilaabo Freelancing (Tallaabooyin).....	58
Fursadaha Dakhli ee IT	58
Khaladaadka Caadiga ah ee Bilowga	59
Sheeko Dhiirrigelin ah	59
SU'AALO JAWAABO MUHIIM AH	59
CUTUBKA 7AAD.....	62
DHISMAHA MUSTAQBALKI IT IYO JOOGTEYNKA GUUSHA ..	62
IT Waa Safar, Ma Aha Meel La Gaadho	62

Joogteynta Guusha (Consistency)	63
Horumarinta Xirfaddaada	63
Dhismaha Sumcad & Magac (Personal Brand)	63
Hoggaamin & Mas'uuliyad Dijitaal ah.....	64
Sheeko Dhiirrigelin ah	64
SU'AALO IYO JAWAABO MUHIIM AH.....	65
CUTUBKA 8AAD.....	69
MUSTAQBALKAL IT, TALOYIN DABEH, IYO FARIIINTA QORAAGA	69
Isbeddelka Degdegga ah ee IT	69
Sidee Dhalinyaradu uga Faa'iidsan Karaan Mustaqbalka IT?	70
Anshaxa & Mas'uuliyadda Dijitaalka	70
Talooyin Dahab ah (Golden Advice).....	71
Sheeko Dhiirrigelin ah	71
SU'AALO IYO JAWAABO MUHIIM AH.....	71
CUTUBKA 9AAD.....	74
IT, BULSHADA IYO DOORKA DHALINYARADA	74
IT iyo Horumarka Bulshada	74
Dhalinyarada iyo Mas'uuliyadda Bulsho	74

IT iyo Waddaniyad.....	75
Sheeko Dhiirrigelin ah	75
Talooyin ku wajahan Dhalinyarada	75
SU'AALO JWAABO MUHIIM AH	76
CUTUBKA 10AAD.....	81
DARDARAN, TALOYIN DHEERAAD AH, IYO WADDOOYINKA XIGA	81
Dardaaran Qoraaga	81
Talooyin Dheeraad Ah	82
SU'AALO JAWAABO MUHIIM AH	84
FARIINTA UGU WEYN:.....	88
GUNAANADKA BUUGGA.....	88

HORDHAC

Dunida aynu maanta ku noolnahay ma aha mid la mid ah tii shalay. Qarnigan waa qarniga ay teknoolojiyaddu hoggaanka u hayso nolosha aadanaha. Wax kasta oo nolosheena ka mid ah waxbarasho, shaqo, ganacsi, isgaarsiin, iyo xitaa fikirkeena waxay si toos ah ama si dadban ugu xiran yihiin IT (Information Technology). Isbeddelkan weyn ma aha mid mustaqbal fog ah; waa mid hadda soconaya, waana mid saameyn ku leh qof kasta, gaar ahaan dhalinyarada.

Dhalinyaradu waa laf-dhabarta bulsho kasta. Waa jiilka qaadaya culayska berri, kana mas'uul noqon doona horumarka ama dib-u-dhaca ummad kasta. Sidaas darteed, su'aasha ugu weyn ee maanta taagan waa:

Sidee dhalinyaradu ula jaanqaadi karaan dunida teknoolojiyadda?

Sidee IT ugu noqon karaa furaha mustaqbalkooda?

Buuggan “Furaha Mustaqbalka: IT – Hagaha Dhalinyarada ee Xirfadaha Dijitaalka” waxa uu u qoran yahay si uu uga jawaabo su'aalahaas waaweyn, una noqdo hagaha dhabta ah ee dhalinyarada doonaya inay fahmaan, bartaan, kuna guuleystaan dunida IT-ga.

Dad badan ayaa IT u arka wax adag, kaliya ku kooban dad gaar ah ama dalal horumaray. Qaar kale waxay u haystaan in IT uu yahay kaliya “computer” ama “coding” oo keliya. Xaqiiqdu se waa mid ka ballaaran taas. IT waa **aqoon, xirfad, fursad, iyo awood**. Waa luuqadda ay dunidu maanta ku wada hadasho.

Qofka fahma IT-ga, wuxuu leeyahay fure uu ku furo albaabo badan oo xirfad, shaqo, iyo horumar nololeed.

Buuggan looma qorin khubaro IT oo hore u jiray oo keliya. Waxa si gaar ah loogu talagalay:

- 1.Dhalinyarada aan weligood IT baran
- 2.Ardayda doonaya jihayn sax ah
- 3.Qof kasta oo raba inuu eber ka bilaabo
- 4.Kuwa niyad jabay ama ka cabsaday IT

Ujeeddada buuggan ma aha in uu ku cabsi geliyo erayo adag ama aqoon sare oo degdeg ah. Halkii, wuxuu si tartiib ah kuugu hagi doonaa, isagoo ka bilaabaya faham guud ilaa xirfado la taaban karo, si aad adigu kalsooni ugu yeelato inaad tidhaahdo:

“Haa, IT waan baran karaa, mustaqbalkaygana waan ku dhisan karaa.”

Buuggan waxa uu isku daraa:

- 1.Aqoon IT oo aasaasi ah
- 2.Sharaxaad fudud oo qoto dheer
- 3.Talooyin nololeed iyo dhiirrigelin
- 4.Aragti mustaqbal iyo tusaalooyin nolosha dhabta ah.

Waxaa si gaar ah diiradda loo saarayaa xaqiiqda ah in dhalinyarada dalalka soo koraya, sida dalkeenna, ay IT uga dhigan tahay **fursad dahabi ah**. Ma aha oo kaliya fursad shaqo, balse waa waddo qofku ku horumarin karo naftiisa, kuna caawin karo qoyskiisa iyo bulshadiisa.

Buuggan wuxuu kugu dhiirrigelinayaa inaad sugayn “waqti ku habboon” ama “qalab dhammeystiran”. Wuxuu kuu

sheegayaa in bilowgu ka muhiimsan yahay dhammeystirka, in tallaabo yar oo maanta la qaado ay ka qiimo badan tahay riyo weyn oo berri dib loo dhigo.

Sidoo kale, buuggan wuxuu si daacad ah uga hadlaya caqabadaha:

- 1.Caajiska
- 2.Cabsida fashilka
- 3.Faham la'aanta
- 4.Helitaan la'aanta agab.

Laakiin halkii uu kaa niyad jebin lahaa, wuxuu ku siinayaa xalal, jihayn, iyo niyad dhis.

Ugu dambeyn, “Furaha Mustaqbalka: IT” ma aha buug aad kaliya akhrido kadibna dhigto. Waa buug lagu qoray si aad ula safarto, mar kasta oo aad bog furto aad u hesho wax ku dhaqaaqiya, wax ku bara, ama wax kugu dhiirrigeliya.

Haddii aad tahay dhalinyaro raba mustaqbal ka wanaagsan kan maanta, haddii aad rabto xirfad ku ilaalin karta qiimahaaga berri, buuggan waa adiga.

IT waa furaha, adiguna gacanta ayaad ku haysaa.

Furaha Mustaqbalka: IT – Hagaha Dhalinyarada ee Xirfadaha Dijitaalka.

CUTUBKA 1AAD

IT & Mustaqbalka Dhalinyarada

Qarnigan aynu ku noolnahay waa qarnigii isbeddelka degdegga ahaa ee ugu weynaa taariikhda aadanaha. Isbeddelkan ma aha mid ku kooban hal dal ama hal bulsho; waa isbeddel saameeyay dunida oo dhan. Teknolojiyadda, gaar ahaan IT (Information Technology), ayaa noqotay awoodda hagaysa nolosha bani'aadamka. Wax kasta oo aan maanta qabanno—waxbarasho, shaqo, ganacsi, xiriir bulsho, iyo helitaanka macluumaad waxay si toos ah ugu xiran yihiin IT.

Dhalinyarada maanta nool waxay ku nool yihiin waqti fursado badan leh, balse sidoo kale caqabado badan leh. Shaqo la'aan, tartan adag, iyo isbeddel degdeg ah ayaa ah waxyaabaha ugu waaweyn ee wajahaya dhalinyarada. Su'aasha taagan waa: Sidee dhalinyaradu u heli karaan jid ay kaga baxaan caqabadahan?

Jawaabtu waa mid cad: IT.

Dhalinyarada iyo Isbeddelka Dunida

Taariikh ahaan, dhalinyaradu mar walba waxay ahaayeen kuwa horseeda isbeddelka. Jiil kasta wuxuu lahaa aalad ama fikrad uu ku muujiyo awooddiisa. Jiilka maanta, aaladdaas waa teknolojiyadda. Qofka dhalinyarada ah ee fahma IT, wuxuu ka horreeyaa qof aan fahmin, xitaa haddii ay isku da' yihiin ama isku waxbarasho heer gaareen.

Dunida maanta, shahaado keliya kuma filna. Wadamada horumaray iyo kuwa soo korayba, waxaa qiimo weyn leh xirfadda aad gacanta ku hayso. IT waa xirfad aan xad lahayn, aan dal ku xaddidnayn, qofkana u furi karta albaabo uu horay u arki waayay.

Waa Maxay IT Dooraka Uu Ku Leeyahay Mustaqbalka?

IT ma aha kaliya computer iyo internet. IT waa:

1. Habka xogta loo ururiyo
2. Sida loo kaydiyo
3. Sida loo farsameeyo
4. Sida loo gudbiyo
5. Sida looga faa'iidaysto

Mustaqbalka dhow, shaqo kasta ha noqoto caafimaad, waxbarasho, ganacsi, ama warbaahin waxay u baahan doontaa IT. Qofka aan IT fahmin wuxuu noqon karaa mid ka haray dunida casriga ah.

Dhalinyarada maanta bilaabata barashada IT, waxay yeelanayaan:

1. Fursad shaqo oo ballaaran
2. Awood ay ku shaqeeyaan meel kasta
3. Xorriyad dhaqaale
4. Kalsooni nafeed

Sababta Dhalinyarada Uga Baahan Yihiin IT

Waxaa jira sababo badan oo IT uga dhigaya mid muhiim u ah dhalinyarada:

Shaqo La'aan Yareyn

IT wuxuu dhalinyarada siinayaa fursad ay ku shaqeeyaan:

1. Online
2. Freelance
3. Remote
4. Ama shirkado caalami ah

Tartanka Caalamiga ah

Dhalinyarada IT-ga taqaanna waxay la tartami karaan dad dunida oo dhan jooga. Hal laptop iyo internet ayaa ku filan.

Hal-abuur & Ganacsi

IT wuxuu dhalinyarada ka dhigayaa hal-abuurayaal (innovators). Waxay samayn karaan:

1. Apps
2. Websites
3. Adeegyo online ah
4. Ganacsi dijitaal ah

Cabsida iyo Khaladaadka Dhalinyarada

Dhalinyaro badan waxay ka baqaan IT sababo ay ka mid yihiin:

1. “Waa adag”
2. “Anigu xisaab ma fiicni”
3. “Waqtii ma hayo”
4. “Qalab ma hayo”

Kuwani waa caqabado maskaxeed, ma aha kuwo dhab ah. Dad badan oo IT ku guuleystay ma aysan haysan:

- Jaamacad qaali ah
- Qalab casri ah
- Taageero buuxda

Waxay lahaayeen hal shay oo keliya: go’aan.

Dhalinyaro badan oo ka yimid dalal sabool ah ayaa maanta ah:

1. Software Developers
2. Cyber Security Experts
3. Digital Entrepreneurs

Waxay ka bilaabeen eber. Qaarna xitaa internet ma aysan haysan maalin walba. Laakiin waxay fahmeen in IT yahay furaha mustaqbalkooda, kana shaqeeyeen si joogto ah.

Farqiga u dhexeeya kuwa guuleysta iyo kuwa fashilma ma aha caqli, balse waa joogteyn iyo dulqaad.

Cutubkan wuxuu kuu dhigayaa aasaaska maskaxeed. Ka hor intaadan baran coding, web, ama AI, waa inaad marka hore fahamtaa:

1. Sababta aad u baranayso IT
2. Waxa IT ka beddeli karo noloshaada
3. Sida aad u aragto mustaqbalkaaga

Haddii aadan haysan aragti cad, xirfaddu ma sii jiri doonto. Laakiin haddii aad fahanto in IT uu yahay jidkaaga, wax walba way kuu fududaanayaan.

IT ma aha doorasho dheeraad ah; waa **baahi**. Dhalinyarada aan maanta qaadan go'aanka barashada IT, waxay halis ugu jiraan inay berri noqdaan kuwo ka dambeeya waqtigooda.

Cutubkan wuxuu kuu sheegayaa hal farriin oo cad:

Mustaqbalka lama sugo, waa la dhistaa. IT-na waa qalabka lagu dhiso.

IT & Mustaqbalka Dhalinyarada

Sheeko Dhab ah: Dhalinyaro Ka Bilaabay Eber

Ka fikir wiil dhalinyaro ah oo ku nool magaalo yar. Ma haysto jaamacad weyn, mana haysto qalab casri ah. Waxa uu haystaa telefoon caadi ah iyo rajo yar. Maalin ayuu maqlaa eray la yiraahdo *IT*. Marka hore wuu iska indha tiraa, sababtoo ah wuxuu u arkaa wax isaga ka weyn. Laakiin mar uu arko qof la mid ah isaga oo internet-ka ka shaqaynaya, fikirkiisu wuu is beddelaa.

Wuxuu bilaabaa inuu habeenkii daawado casharro YouTube ah, maalintii wuu shaqeeyaa, habeenkiina wuu barta. Wuxuu ku fashilmaa marar badan, wuu daalaa, marna wuu ka quustaa. Laakiin mar walba wuxuu xusuustaa sababta uu u bilaabay. Sanad kadib, wuxuu helaa shaqo online ah. Ma aha mid weyn, balse waa bilow. Maanta, wuxuu ka mid yahay dhalinyarada noloshooda IT beddelay.

Sheekadan ma aha mid gaar u ah hal qof; waa sheekada dhalinyaro badan oo fahmay in **bilow yar uu keeni karo isbeddel weyn**.

Tusaalooyin Nolosha Dhabta ah

1: Arday Dugsi Sare

Arday dugsi sare ah ayaa barta:

1. Basic computer skills
2. Internet usage
3. Graphic design fudud

Markuu qalin-jebiyo, wuxuu bilaabaa inuu sameeyo designs yar yar. Tani waxay u noqotaa il dhaqaale inta uu waxbarasho sii wato.

2: Qof Shaqo La'aan ah

Qof shaqo la'aan ah wuxuu barta:

1. Web development

2. Freelancing

Bil kadib, wuxuu sameeyaa website yar. 6 bilood kadib, wuxuu bilaabaa inuu helo macaamiil.

3: Gabadh Dhalinyaro ah

Gabadh dhalinyaro ah oo aan hore u haysan fursad waxbarasho, waxay barato:

1. Online marketing
2. Social media management

Maanta waxay maamushaa bogag ganacsi, waxayna leedahay dakhligooda.

IT & Isbeddelka Maskaxda Dhalinyarada

IT ma beddesho kaliya xirfaddaada, waxay beddeshaa qaabka aad u fikirto:

1. Waxaad barataa xal raadinta
2. Waxaad noqotaa qof is-baraya
3. Waxaad barato dulqaad & joogteyn
4. Waxaad fahantaa in guushu tahay safar

Dhalinyarada IT barata waxay noqdaan kuwo:

1. Maskax furnaan leh
2. Ku fikiraya xal, ma aha caqabad
3. Aan ka baqin khalad

Khaladaad Ay Dhalinyaradu Sameeyaan (Iyo Sida Loo Saxo)

- ✗ In la isku dayo wax walba hal mar
- ✗ In la joojiyo marka ay adkaato
- ✗ In la is barbardhigo dadka hore u socday
- ✗ In la sugo qalab dhammeystiran
- ✓ Doorro hal xirfad
- ✓ Joogtee xitaa haddii ay adkaato
- ✓ Is barbar dhig naftaada shalay
- ✓ Ku bilow waxa aad haysato

Farriin Toos ah oo Akhristaha Loo Dirayo

Haddii aad akhrinayso cutubkan, ogow:

1. Ma daahin
2. Ma tihid mid caqli yar
3. IT adiga kuu bannaan

Farqiga kaliya ee u dhexeeya adiga iyo qofka IT ku guuleystay waa tallaabada koowaad.

Gunaanad Cutubka 1aad

Cutubkan wuxuu si cad kuu tusay in IT uusan ahayn sheeko ama riyo. Waa xaqiiqo taagan. Waa jid furan. Waa fure dhab ah.

Dhalinyarada maanta qaadata go'aanka barashada IT, berri ma sugi doonto fursad iyada ayaa abuuri doonta.

CUTUBKA 2AAD

Waa Maxay IT? Fahamka Aasaaska Teknolojiyadda

Ka hor inta aadan baran xirfad gaar ah sida programming, web design, ama cyber security, waa lama huraan inaad marka hore si qoto dheer u fahanto hal su'aal oo aasaasi ah:

Waa maxay IT?

Dad badan ayaa maqla erayga IT, balse fahamkoodu waa mid kooban ama qaldan. Qaar waxay u haystaan inuu yahay kaliya computer; qaarna coding oo keliya; qaar kalena waxay u arkaan wax aad u adag oo kaliya khubaro u gaar ah. Cutubkan wuxuu kuu furayaa faham buuxa, sax ah, oo fudud, si aad IT u aragto sidii uu dhab ahaan yahay.

Macnaha IT (Information Technology)

IT waa soo gaabin erayga Information Technology, micnihiisuna yahay Teknolojiyadda Macluumaadka. Si fudud loo dhigo, IT waa habka xogta loo adeegsado iyadoo la adeegsanayo qalab teknooloji ah.

IT wuxuu ka kooban yahay:

1. Ururinta xogta
2. Kaydinta xogta
3. Farsamaynta xogta
4. Gudbinta xogta
5. Ilaalinta xogta

Marka aad taleefan ku dirto fariin, marka aad internet ka raadsato war, marka aad lacag ku dirto mobile money IT ayaad isticmaalaysaa, xitaa haddii aadan dareemin.

Cashar Muhiim ah (Key Takeaway)

IT ma aha wax fog ama adag.

Waa wax kugu dhex jira noloshaada maalin kasta.

Fahamkiisu waa tallaabada koowaad ee guusha.

Qofkii fahma aasaaska IT, wuxuu si fudud ugu gudbi karaa xirfad kasta oo casri ah.

IT Maaha Kaliya Computer

Khaladka ugu weyn ee la sameeyo waa in IT lagu soo koobo computer. Xaqiiqdu waa in computer-ku yahay qalab kaliya, balse IT waa nidaam dhan.

IT waxaa ka mid ah:

- ✓ Computers & Laptops
- ✓ Mobile phones
- ✓ Internet & Networks
- ✓ Software & Applications
- ✓ Databases & Cloud
- ✓ Amniga xogta

Haddii mid ka mid ah qaybahan maqnaado, IT si buuxda uma shaqayn karto.

Qaybaha Ugu Waaweyn ee IT

Si aad IT u fahanto si qoto dheer, waa inaad kala fahantaa qaybaha uu ka kooban yahay:

Hardware

Hardware waa dhammaan qalabka la taaban karo:

- ✓ Computer
- ✓ Keyboard
- ✓ Mouse
- ✓ Printer
- ✓ Server

Hardware la'aantiis, software ma shaqeyn karo.

Software

Software waa barnaamijyada lagu shaqeeyo:

- ✓ Windows
- ✓ Android
- ✓ Applications (Apps)
- ✓ Programs

Software ayaa computer-ka u sheegaya waxa uu qabanayo.

Networking

Networking waa isku xirka qalabka:

- ✓ Internet
- ✓ Wi-Fi

- ✓ Local Network (LAN)

Network la'aantiis, wadaagid xog ma jirto.

Data & Information

Xogtu waa laf-dhabarta IT:

- ✓ Qoraal
- ✓ Sawir
- ✓ Cod
- ✓ Video

Qofka fahma sida xogta loo maareeyo, wuxuu fahmay IT.

IT vs Computer Science (Farqiga u Dhexeeya)

Dad badan ayaa isku khalda IT iyo Computer Science.

- ✓ **IT** → Diiradda saarta *isticmaalka* teknoolojiyadda
- ✓ **Computer Science** → Diiradda saarta *abuurista & cilmi-baarista* teknoolojiyadda

Tusaale:

- ✓ IT: Maamulidda system, network, security
- ✓ CS: Algorithms, logic, theory

Labadooduba waa muhiim, balse IT waa kan ugu fudud ee dhalinyaradu ku bilaabi karaan.

Sida IT Ugu Shaqeeyo Nololmaalmeedka

IT kuma jiro oo kaliya xafiis ama shirkad. Waxaad ka helaysaa:

- ✓ Iskuulo (online learning)
- ✓ Isbitaallo (medical records)
- ✓ Ganacsi (online payments)
- ✓ Warbaahin (social media)
- ✓ Dowladda (digital services)

Nolosha casriga ah IT la'aantiis ma shaqeyn karto.

Tusaalooyin Dhab ah (Real Life Examples)

Tusaale 1: Dukaanka Yar

Ganacsade yar oo isticmaala:

- ✓ Mobile money
- ✓ WhatsApp
- ✓ Facebook

Wuxuu adeegsanayaa IT si uu u ballaariyo ganacsigiisa.

2: Arday

Arday isticmaala:

- ✓ Google
- ✓ YouTube
- ✓ Online exams

IT ayaa u fududeysay waxbarashadiisa.

Fahamka IT ee Dhalinyarada (Maskaxda Saxda ah)

IT looma baahna:

- ✓ Caqliga ugu sarreeya
- ✓ Qalab qaali ah
- ✓ Jaamacad gaar ah

IT waxay u baahan tahay:

- ✓ Xiise
- ✓ Dulqaad
- ✓ Joogteyn

Qof kasta wuu baran karaa.

Khaladaadka Bilowga

- ✗ In la yiraahdo “Waqti ma hayo”
- ✗ In la isku dayo wax walba
- ✗ In la baro si aan qorshe lahayn
- ✓ Doorro hal jid
- ✓ Samee jadwal
- ✓ Ku soco talaabo talaabo

IT Ma Adiga Ayuu Kuu Habboon Yahay?

Haddii aad:

- ✓ Jeceshahay barashada wax cusub
- ✓ Xiisaynayso xalinta dhibaatooyinka
- ✓ Doonayso mustaqbal furan

Markaas IT adiga ayuu kuu yaallaa.

Gunaanad Cutubka 2aad

Cutubkan wuxuu kuu dhisay fahamka aasaaska ah ee IT. Ka hor intaadan qaadan xirfad gaar ah, waa inaad marka hore fahantaa waxa IT yahay iyo sida uu u shaqeeyo.

SUAALO IYO JAWABO MUHIIM AH

Ma fahmay IT inuu ka ballaaran yahay computer?

Haa, hadda waan fahmay in IT uusan ahayn computer oo keliya. IT wuxuu ka kooban yahay qalab (hardware), barnaamijyo (software), internet iyo shabakado (network), iyo xog (data). Waxaan sidoo kale fahmay in IT uu ku dhex jiro nolosheyda maalin kasta taleefankayga, internet-ka, mobile money, iyo baraha bulshada xitaa markii aanan dareemin.

Qaybtee IT ayaan xiiseeya?

Anigu waxaan xiiseynayaa (**tusaale dooro mid ama dhowr**):

- ✓ Web & Internet (sameynta websites, isticmaalka online tools)
- ✓ Programming (coding iyo xalinta dhibaatooyinka)
- ✓ Cyber Security (ilaalinta xogta iyo amniga)
- ✓ Digital Skills (graphic design, social media, online work)

Xiisahan wuxuu iga caawinayaa inaan doorto **hal jid oo cad** oo aan ku bilaabo, halkii aan wax walba isku dayi lahaa mar keliya.

Maxaa iga hor istaagi kara barashada IT?

Waxyaabaha iga hor istaagi kara waa:

- Qorshe la'aan ama jadwal la'aan
- Cabsida ah “waa adag” ama “ma awoodo”
- Joogteyn la'aan marka ay adkaato
- Is-barbardhigga dadka hore u socday

Laakiin hadda waan fahmay in caqabadahani ay yihiin **maskaxeed**, xalna ay leeyihiin: qorshe yar, joogteyn, iyo dulqaad.

Waa maxay IT?

IT (Information Technology) waa adeegsiga qalabka, barnaamijyada, shabakadaha, iyo nidaamyada dijitaalka ah si loo kaydiyo, loo habeeyo, loona gudbiyo xog iyo macluumaad.

Maxay yihiin 4-ta qaybood ee ugu waaweyn IT?

Afarta qaybood ee IT waa:

1. **Hardware** – qalabka la taaban karo sida computer, mobile, printer
2. **Software** – barnaamijyada sida Windows, apps, iyo websites
3. **Network** – internet-ka iyo isku xirka qalabka
4. **Data** – xogta iyo macluumaadka la isticmaalayo

Maxaa farqi u dhexeeya IT iyo Computer Science?

- **IT** wuxuu diiradda saaraa isticmaalka, maamulidda, iyo dayactirka teknoolojiyadda.

- **Computer Science** wuxuu diiradda saaraa abuurista, barashada, iyo horumarinta barnaamijyada iyo nidaamyada.

Hal tusaale ka bixi IT oo noloshaada ku jira.

Tusaale IT ah waa **isticmaalka mobile money**, halkaas oo taleefanka, internet-ka, iyo nidaam dijitaal ah ay si wadajir ah u shaqeeyaan si lacag loo diro ama loo helo.

Sidee IT u beddeli karaa mustaqbalka dhalinyarada?

IT wuxuu dhalinyarada siinayaa xirfado shaqo, fursado online ah, ganacsi dijitaal ah, iyo awood ay kaga qayb qaataan suuqa caalamiga ah iyagoo jooga dalkooda.

Haddii internet la waayo, sidee ayey IT u saameynaysaa nolosha?

Haddii internet la waayo, adeegyo badan sida isgaarsiinta, ganacsiga online-ka, waxbarashada fog, iyo helidda macluumaadka ayaa istaagi doona ama aad u gaabin doona.

Maxay tahay sababta IT loogu taliyay dhalinyarada maanta?

IT waxaa loogu taliyay dhalinyarada sababtoo ah waa xirfad mustaqbal leh, shaqo-abuur ah, la jaanqaadaysa waqtiga, isla markaana qofka siinaysa fursad uu isku horumariyo kana qayb qaato horumarka bulshada. Fahamka IT waa furaha mustaqbalka dijitaalka ah. Qofkii barta maanta, berri ayuu hoggaamiyaa

CUTUBKA 3AAD

QALABKA IYO AQOONTA ASAASIGA AH EE IT

Qof kasta oo raba inuu galo dunida IT, waa inuu marka hore fahmaa qalabka uu adeegsanayo iyo aqoonta aasaasiga ah ee uu u baahan yahay. Sida qof dhisme bilaabaya uusan u bilaabi karin dabaq sare isagoo aan saldhig dhigin, sidoo kale qof IT baranaya ma horumari karo ilaa uu fahmo aasaaska.

Dunida maanta aan ku noolnahay waa mid si xawli ah u beddelmeysa. Shaqooyin baa dabar go'aya, kuwo cusubna way soo baxayaan. Waxa kaliya ee mideeya isbeddelkan waa tiknoolajiyadda (IT). Qof kasta oo raba inuu la jaanqaado waqtiga, gaar ahaan dhalinyarada, waa inuu marka hore fahmaa qalabka uu adeegsanayo iyo aqoonta aasaasiga ah ee ka dambeysa.

Cutubkan saddexaad wuxuu u taagan yahay tallaabada ugu muhiimsan ee u dhexeysa fahamka guud ee IT iyo xirfad dhab ah oo la adeegsan karo. Haddii cutubyadii hore ay kuu ahaayeen aragti iyo wacyigelin, cutubkani wuxuu kuu noqonayaa meeshii aad gacmaha gelin lahayd shaqada. Waa halka aad ka baranayso waxa aad u baahan tahay si aad u bilowdo, xitaa haddii aad haysato qalab yar iyo fursado kooban.

Dhalinyaro badan ayaa aaminsan in IT lagu barto oo keliya jaamacado waaweyn ama qalab qaali ah. Cutubkani wuxuu burburinayaa fikirkaas. Wuxuu caddeynayaa in mobile kaliya, maskax furan, iyo rabitaan barasho ay kugu filan yihiin bilowga.

Waxa kaliya ee kaa maqan inta badan waa faham sax ah iyo jihayn cad kuwaas oo cutubkani ku siinayo.

Hordhacan wuxuu sidoo kale kuu sheegayaa in IT uusan ahayn wax lagu degdego ama hal mar la wada barto. Waa **safar**, bilowgiisana wuxuu ka bilaabmaa aasaas adag. Sida qof doonaya inuu dhismo sameeyo uusan ugu horreyn saarin qurxin iyo rinji, balse marka hore dhiga saldhig adag, sidoo kale qof IT baranaya waa inuu marka hore fahmaa:

- ✓ Qalabka uu adeegsanayo
- ✓ Sida qalabkaasi u shaqeeyo
- ✓ Waxa laga filayo marka la adeegsanayo
- ✓ Iyo sida aqoontaas loogu beddelo fursad nololeed

Cutubkani wuxuu ku tusayaa in qalabka aad haysato hadday noqoto laptop duug ah ama taleefan casri ah uu noqon karo albaab mustaqbal kuu furmaya haddii aad si sax ah u fahanto. Waxaa muhiim ah in aad barato sida qalabkaaga loo isticmaalo si wax ku ool ah, halkii aad uga isticmaali lahayd madadaalo keliya.

Inta aad cutubkan akhrinayso, waxaa lagaa filayaa inaad u akhrin sida buug sheeko, balse aad u akhrido sida hag isbeddel nololeed. Qodob kasta, tusaale kasta, iyo sheeko kasta waxaa loogu talagalay inay ku kiciso su'aal muhiim ah:

“Anigu maxaan ka sameyn karaa IT anigoo jooga meesha aan joogo?”

Ujeeddada ugu weyn ee Cutubka 3aad waa in uu kaa saaro jahawareerka bilowga, kaa yareeyo cabsida tiknoolajiyadda, isla markaana ku tuso in barashada IT ay tahay wax la qorsheyn karo, la gaari karo, lana hirgelin karo. Markaad dhammayso

cutubkan, waa inaad awood u yeelataa inaad si kalsooni leh u tiraahdo:

“Haa, waan ogahay qalabka aan u baahanahay, waanan bilaabi karaa maanta.”

Cutubkani waa furaha kuu diyaarinaya wejiga xiga ee buuggan kaas oo ah xirfadaha IT ee mustaqbalka, halkaas oo aqoonta aad halkan ka baratay ay u beddeli doonto xirfad la taaban karo, shaqo, ama ganacsi dijitaal ah.

Cutubkan wuxuu kuu noqonayaa albaabka laga galo IT, wuxuuna kaa caawinayaa inaad fahanto:

- ✓ Qalabka IT ee ugu muhiimsan
- ✓ Sida qalabku u shaqeeyo
- ✓ Aqoonta ugu yar ee qof walba u baahan yahay
- ✓ Sida dhalinyaro badan ay uga bilaabeen wax yar una gaareen meel fog

Waa Maxay Qalabka IT?

Qalabka IT waa wax kasta oo lagu shaqeeyo, lagu kaydiyo, ama lagu gudbiyo macluumaad dijitaal ah. Qalabkani wuxuu noqon karaa mid aad taaban karto ama mid software ah.

IT ma ahan kaliya computer miis saaran; waa **nidaam dhammeystiran**.

Qaybta 1aad: Hardware (Qalabka La Taaban Karo)

Waa maxay Hardware? Hardware waa dhammaan qalabka jir ahaan u jira ee IT-ga ka mid ah.

Tusaalooyin Hardware:

- ✓ Computer (Desktop & Laptop)
- ✓ Mobile phone
- ✓ Keyboard & Mouse
- ✓ Printer & Scanner
- ✓ Server
- ✓ Router & Modem
- CPU → Maskaxda
- RAM → Xusuusta degdegga ah
- Hard Disk → Kaydinta
- Motherboard → Isku xirka dhammaan qaybaha

Sheeko Gaaban:

Cabdi wuxuu haystay laptop duug ah. Dadku waxay ku yiraahdeen “ma shaqeynayo”. Laakiin markuu barto hardware, wuxuu ogaaday in RAM yar yahay. Wuu kordhiyay, laptop-kiina dib ayuu u nooladay. Halkaas ayuu ka bilaabay fahamka IT.

Waa maxay Software?

Software waa **barnaamijka amar siinaya hardware-ka** si uu shaqo u qabto.

Noocyada Software:

1. System Software

- Windows
- Linux
- MacOS

2. Application Software

- Microsoft Word

- Browser (Chrome, Firefox)
- Mobile Apps

Tusaale Fudud:

Hardware waa sida **jirka**, Software-na waa sida **maskaxda**.
Mid la'aan kan kale ma shaqeeyo.

Network & Internet

Waa maxay Network?

Network waa isku xirka qalabyo kala duwan si ay xog u wadaagaan.

Noocyada Network:

- Local Network (xafiis, guri)
- Internet (adduunka oo dhan)

Data (Xog)

Waa maxay Data?

Data waa **xogta IT-da shaqadeedu ku wareegto:**

- Magacyo
- Sawirro
- Lacag
- Macluumaad waxbarasho

IT = Qalab + Barnaamij + Internet + Xog

Haddii xog la waayo, IT wax macno ah ma laha.

Aqoonta Aasaasiga ah ee Qof Walba u Baahan Yahay

Dhalinyaro badan waxay yiraahdaan: “*Coding ma aqaan*”
Laakiin ka hor coding, waxaa jira waxyaabo muhiim ah:

Aqoonta Aasaasiga ah:

- ✓ Sida computer loo isticmaalo
- ✓ Sida file loo abuur, loo tirtiro
- ✓ Sida internet loo baadho
- ✓ Sida email loo diro
- ✓ Sida qalabka loo ilaaliyo (security)

Qofkii tan barta, wuxuu durba noqday IT Beginner dhab ah.

Sheeko Dhiirrigelin ah

Xaliimo waxay ku bilaabatay mobile kaliya. Waxay baratay:

- ✓ Email
- ✓ Google search
- ✓ Online courses

Maanta waxay ka shaqeysaa online, iyadoo gurigeeda joogta. Qalab yar, aqoon yar, joogteyn badan—taasi waa sirta IT.

SU'AALO IYO JWAABO

Qalabka IT ee aad hadda haysato

Qalabka IT ee aan haysto & Shaqadooda

- ✓ Mobile Phone (Taleefan Casri ah)

Mid kasta waxa uu kuu qabto

- ✓ Isgaarsiin (wacis & farriimo)
- ✓ Internet isticmaal (barasho, warar)
- ✓ Adeegsiga apps (lacag diris, baraha bulshada)

2. Laptop / Computer

Wuxuu ii qabtaa:

- Qorista dukumiintiyo
- Barashada IT & courses online
- Shaqo iyo cilmi-baaris

3. Internet (Wi-Fi ama Mobile Data)

Wuxuu ii qabtaa:

- Xiriir caalami ah
- Barasho fog (online learning)
- Ganacsi iyo shaqo online

4. USB / Memory Card

Wuxuu ii qabtaa:

- Kaydinta xog
- Gudbinta files

1. Haddii internet la waayo, maxaa iga istaagaya?

Haddii internet la waayo:

- Ma heli karo macluumaad cusub
- Ma wada xiriiri karo si degdeg ah
- Shaqooyin online ah way istaagi karaan
- Waxbarashada fog way adkaanaysaa

Kee ayaan ugu tiirsanahay?

Waxaan ugu tiirsanahay:

- Internet-ka (xog & barasho)
- Mobile phone (isgaarsiin & shaqo)
- Computer (qorid & wax-soo-saar)

Waa maxay hardware?

Hardware waa dhammaan qalabka jir ahaan u jira ee IT ka mid ah, sida computer, mobile, keyboard, printer, iyo router.

Maxaa farqi u dhexeeya hardware iyo software?

- **Hardware** waa qalabka la taaban karo
- **Software** waa barnaamijka ku shaqeeya hardware-ka

Mid walba kan kale la'aantiis ma shaqeyn karo.

Maxay network muhiim u tahay?

Network waa muhiim sababtoo ah:

- Waxay suurtagelisaa isgaarsiin
- Waxay fududeysaa wadaagista xog
- Waxay isku xirtaa qalabyo kala fog

La'aanteed, IT wuxuu noqdaa mid go'doon ah.

Maxay data ugu tahay laf-dhabarta IT?

Data waa laf-dhabarta IT sababtoo ah:

- Dhammaan nidaamyada IT xog bay ku shaqeeyaan
- Haddii data la waayo, IT qiimo ma laha
- Data ayaa go'aanno iyo adeegyo dhaliya

IT = Hardware + Software + Network + Data

Gunaanad Cutubka 3aad

Cutubkan wuxuu ku baray:

- Qalabka IT
- Qaybaha IT
- Aqoonta bilowga
- Sida loo bilaabo si fudud

Hadda waxaad diyaar u tahay xirfadaha dhabta ah ee IT.

Layligan wuxuu kaa caawinayaa inaad ogaato in qalab aad horay u haysatay uu yahay fursad IT.

Layligani wuxuu kuu muujinayaa kaalinta weyn ee IT ku leeyahay noloshaada.

CUTUBKA 4AAD

XIRFADAHA IT EE MUSTAQBALKA

Adduunku ma sugayo qof diyaar noqda; wuxuu abaalmaryaa qof bilaaba. Maanta xirfadaha shaqo laguma qiimeeyo shahaado keliya, balse waxaa la eegaa **waxa aad qaban karto**. IT wuxuu noqday luuqadda cusub ee dunida, qofkii bartaana wuxuu helayaa fursado ka baxsan xuduud, da' iyo xaalad dhaqaale.

Cutubkan afraad wuxuu kuu furayaa albaabka **xirfadaha IT ee ugu baahida badan maanta iyo berriba**. Waa cutubka kaa saari doona heerka “waan fahmay IT” kuna gaarsiin doona heerka “waan ka shaqeyn karaa IT”.

Waa Maxay Xirfad IT?

Xirfad IT waa aqoon iyo karti la isku daray oo kuu saamaxaysa:

- ✓ Inaad xaliso dhibaatooyin dijitaal ah
- ✓ Inaad adeeg ama adeegsi abuurto
- ✓ Inaad shaqo ama dakhli ka hesho IT

Xirfaddu ma aha wax buug lagu akhriyo oo keliya, waa **wax la barto, la tababarto, lana ku dhaqmo**.

Sababta Xirfadaha IT Mustaqbal u Leeyihiin

Xirfadaha IT waa mustaqbal sababtoo ah:

- ✓ Dunidu waxay ku socotaa dijitaal
 - ✓ Shaqooyin cusub ayaa mar walba soo baxaya
 - ✓ Shaqooyin badan online bay noqdeen
 - ✓ Hal xirfad ayaa kuu shaqeyn karta meelo badan
- Qofkii IT yaqaan, shaqadu iyadaa raadsata.

Programming Code

Waa maxay Programming?

Programming waa qorista amarro (code) si computer ama app u shaqeeyo.

Tusaalooyin:

- Website sameyn
- App mobile
- Software

Luuqado Bilow Ku Habboon:

- HTML & CSS
- JavaScript
- Python

Programming waa xirfad fakar iyo xal-abuur labadaba ah.

Web Development

Waa maxay Web Development?

Web Development waa sameynta iyo horumarinta websites.

Qaybaha:

- ✓ Frontend (waxa la arko)
- ✓ Backend (waxa ka dambeeya)

Tusaale:

Website ganacsi, blog, ama waxbarasho.

Graphic Design & UI/UX

Waa maxay?

Sameynta naqshad muuqaal qurux badan:

- ✓ Logos
- ✓ Posters
- ✓ Website design

UI/UX → Khibradda isticmaalaha

Qof design yaqaan waa qof fikrad arki kara.

Cyber Security

Waa maxay?

Ilaalinta nidaamyada IT iyo xogta.

Maxaa ka dhigay muhiim?

- ✓ Xatooyo xog
- ✓ Hacking
- ✓ Dhibaatooyin amni

Amniga IT waa gaashaan mustaqbalka.

Data & Artificial Intelligence (AI)

Data Analysis:

- ✓ Fahamka xog
- ✓ Go'aan qaadasho

AI:

- ✓ Machine Learning
- ✓ Automation

Data waa saliidda cusub ee dunida.

Digital Skills & Online Work

- ✓ Social Media Management
- ✓ Content Creation
- ✓ Freelancing

Qof guriga jooga ayaa caalamka la shaqeyn kara.

Sidee Loo Doortaa Xirfad IT?

Isweydii:

1. Maxaan xiiseeyaa?
2. Maxaan dulqaad u leeyahay?
3. Maxay suuqa u baahan yahay?

Hal xirfad dooro, kuna dadaal.

Sheeko Dhiirrigelin ah

Maxamed wuxuu bilaabay barashada Web Development isagoo mobile adeegsanaya. Maanta wuxuu sameeyaa websites ganacsi, wuxuuna ka helaa dakhli joogto ah.

Ma uusan sugin qalab qumman wuxuu bilaabay waxa uu hayay.

SU'AALO IYO JAWAABO MUHIIM AH

Qor 3 xirfad IT oo aad xiiseyneyso

Mid walba sababta aad u dooratay?

3 Xirfad IT oo aan Xiiseeyo

1. Web Development

Sababta aan u doortay:

- Wuxuu ii saamaxayaa inaan sameeyo websites
- Waa xirfad si weyn loo raadsado
- Waxaa lagu baran karaa online iyo qalab yar

2. Graphic Design / UI-UX

Sababta aan u doortay:

- Waxaan jeclahay naqshad iyo hal-abuur
- Waxay leedahay fursado freelance ah
- Waxaa si toos ah loogu shaqeyn karaa ganacsi

3. Cyber Security

Sababta aan u doortay:

- Waa xirfad mustaqbal leh
- Amniga xogta waa arrin sii kordhaysa
- Mushaharkeeda waa mid wanaagsan

Akhristuhu wuxuu beddeli karaa xirfadaha ku habboon isaga.

Ka dooro HAL xirfad:

- **Maxaan ka bartaa?**
- **Xagee ka baran karaa?**
- **Immisa waqti ayaan siin karaa?**

Hal Xirfad oo La Doortay

Xirfadda an doortay: *Web Development*

1. Maxaan ka bartaa?

- HTML & CSS
- JavaScript
- Sida website loo dhiso loona daabaco

2. Xagee ka baran karaa?

- YouTube
- Courses online (free & paid)
- Buuggan dhexdiisa cutubyada xiga

3. Immisa waqti ayaan siin karaa?

- 1–2 saac maaintii
- 5–6 maalmood usbuucii

Joogteyn yar oo joogto ah ayaa ka wanaagsan dadaal weyn oo goos-goos ah.

Waa maxay xirfad IT?

Xirfad IT waa aqoon iyo karti qofku u leeyahay adeegsiga ama horumarinta tiknoolajiyadda si uu xal u bixiyo ama shaqo u qabto.

Maxay xirfadaha IT mustaqbal u leeyihiin?

Xirfadaha IT mustaqbal bay leeyihiin sababtoo ah:

- Dunidu waxay u wareegeysaa dijitaal
- Shaqooyin badan online bay noqdeen
- Teknoolojiyaddu si joogto ah ayay u

horumareysaa

Magacow 3 xirfad IT.

- Programming
- Web Development
- Graphic Design / UI-UX

(sidoo kale: Cyber Security, Data Analysis, AI)

Maxaa muhiim u ah doorashada xirfad?

Waxa ugu muhiimsan waa:

- Xiisaha qofka
- Baahida suuqa
- Joogteyn iyo dulqaad

Xirfad la jecel yahay ayaa si fudud loo barta.

Gunaanad Waxbarasho

Layliyadan iyo su'aalahan:

- Waxay kaa caawinayaan inaad doorato jid cad
- Waxay kaa saaraan wareerka bilowga
- Waxay kuu diyaarinayaan ficil dhab ah

CUTUBKA 5AAD

SIDA LOO BARTO IT QORSHE, JOOGTEYN & HIRGELIN

Dad badan waxay jecel yihiin IT, balse dad yar ayaa si dhab ah u barta. Sababta ugu weyn ma aha karti la'aan, waa qorshe la'aan. Barashada IT waxay u baahan tahay nidaam, dulqaad, iyo joogteyn, halkii ay ka ahaan lahayd ku-tiirsanaan kaliya rabitaan.

Cutubkan shanaad wuxuu kuu noqonayaa hag tallaabo-tallaabo ah oo ku baraya sida IT loo barto si wax ku ool ah, adigoon isku daalin ama ka quusan bartamaha. Waa cutubka kuu beddelaya rajo iyo xiise ficil iyo natiijo.

Maskaxda Saxda ah (Right Mindset)

Kahor intaadan bilaabin barashada IT, waa inaad fahantaa dhowr arrimood:

- ✓ IT ma aha wax hal habeen lagu barto
- ✓ Qaladku waa qayb ka mid ah barashada
- ✓ Isbarbardhigga dadka kale wuu niyad jebinayaa
- ✓ Joogteyn yar oo joogto ah ayaa guul keenta

Qofkii maalin walba wax yar barta, sanad gudihiis wuu yaabiyaa naftiisa.

Tallaabooyinka Aasaasiga ah ee Barashada IT

Tallaabo 1: Dooro Hal Jid

Ha isku dayin wax walba hal mar. Dooro **hal xirfad IT** oo aad diiradda saarto.

Tallaabo 2: Baro Aasaaska

Kahor xirfad sare:

- ✓ Faham computer
- ✓ Faham internet
- ✓ Faham qalabkaaga

Tallaabo 3: Ku Baro Wax-qabad

Akh rin kaliya ma filna:

- ✓ Ku celceli
- ✓ Tijaabi
- ✓ Khalad samee

Qorshe Barasho 90 Maalmood ah (Bilow Tusaale)

Bil 1: Aasaaska

- ✓ Fahamka IT & qalabka
- ✓ Barashada computer basics
- ✓ Internet & email
- ✓ Xirfadda aad dooratay: hordhac

Bil 2: Xirfad & Tababar

- ✓ Barashada xirfadda si qoto dheer
- ✓ Layliyo maalinle ah
- ✓ Daawashada casharro
- ✓ Sameynta mashruuc yar

Bil 3: Adeegsi & Wax-soo-saar

- ✓ Samee mashruuc dhab ah
- ✓ Ku dar portfolio
- ✓ Baro sida shaqo loo helo
- ✓ Qiimee horumarkaaga

90 maalmood oo dadaal ah ayaa beddeli kara jihada noloshaada.

Sida Waqtiga Loo Maareeyo

Haddii aad leedahay waqti yar:

- ✓ 1 saac maalintii waa ku filan
- ✓ Ka dhig jadwal joogto ah
- ✓ Ka fogow mashquul badan

Tusaale Jadwal:

- Subax: 30 daqiiqo
- Fiid: 30 daqiiqo

Caqabadaha Caadiga ah & Sida Loo Ka Gudbo

Caqabad: “Waa adag”

✓ Xal: Bilow wax fudud

Caqabad: “Waqti ma hayo”

✓ Xal: Isticmaal waqtiyada faaruqa

Caqabad: “Waan quustay”

✓ Xal: Xusuuso sababta aad u bilowday

Sheeko Dhiirrigelin ah

Ayaan waxay lahayd waqti yar iyo qalab kooban. Waxay dejisay jadwal 1 saac ah maalintii. 6 bilood kadib, waxay yeelatay xirfad online ah oo ay ka shaqeyso.

Ma aysan sugin fursad iyadaa abuurday.

SU’AALO IYO JAWAABO MUHIIM AH

Qor:

- **Xirfadda aad dooratay**
- **Sababta aad u dooratay**
- **Wagtiga aad siin karto**

Xirfadda, Sababta & Wagtiga

Xirfadda aan doortay: *Web Development*

Sababta aan u doortay:

- Waa xirfad si weyn loo raadsado

- Waxaa lagu baran karaa online
- Waxay fursad u siisaa shaqo iyo freelance

Waqtiga aan siin karo:

- 1 saac maalintii
- 5–6 maalmood usbuucii

Akhristuhu wuxuu ku beddeli karaa xirfadda iyo waqtiga ku habboon isaga.

Samee jadwal 7 maalmood ah oo barasho IT ah?

Jadwal 7 Maalmood ah oo Barasho IT

Isniin:

- Fahamka aasaaska IT
- Daawasho cashar kooban

Talaado:

- Barashada HTML (hordhac)
- Qorid layli yar

Arbaco:

- CSS (naqshad & midab)
- Ku celcelin

Khamiis:

- JavaScript (hordhac)
- Fahamka fikradda

Jimco:

- Ku celcelin wixii la bartay
- Saxid khaladaad

Sabti:

- Sameynta mashruuc yar
- Tijaabo & horumarin

Axad:

- Nasasho + dib u eegis
- Qorshayn usbuuca xiga

 *Jadwal cad wuxuu ka dhigayaa barashada mid sahlan.*

Maxaa muhiim u ah qorshe barasho?

Qorshe barasho wuxuu kaa caawinayaa inaad:

- Ogaato waxa aad baranayso
- Siiso waqtigaaga jihayn
- Ka fogaato wareer iyo daal

Qorshe la'aantiis, barashadu waxay noqotaa mid goos-goos ah.

Maxay joogteyntu muhiim u tahay?

Joogteyntu waa muhiim sababtoo ah:

- Waxay dhistaa xirfad si tartiib ah
- Waxay yareysaa illoobidda
- Waxay kordhisaa kalsoonida

Wax yar oo joogto ah ayaa ka wax tar badan wax badan oo mar-mar ah.

Maxaa caqabad ku noqon kara barashada IT?

Caqabadaha caadiga ah waa:

- Waqti la'aan
- Qorshe la'aan
- Cabsida qaladka
- Quus degdeg ah

Sidee caqabado looga gudbaa?

Caqabado waxaa looga gudbaa:

- Dejinta yoolal yaryar
- Sameynta jadwal la raaco
- Dulqaad iyo isku kalsooni
- In la xasuusto sababta la bilaabay

Qofkii samra, wuu gaarayaa.

Gunaanad Waxbarasho

Layliyadan iyo su'aalahan:

- Waxay kuu diyaarinayaan ficil dhab ah
- Waxay kaa saaraan fikir kaliya
- Waxay kaa dhigayaan barte qorshe leh

CUTUBKA 6AAD

SHAQO IYO DAKHLI IT FREELANCE, ONLINE & FURSADO CASRI AH

Barashada IT ujeeddo keliya ma leh haddii aysan ku xigin **natiijo nololeed**. Dhalinyaro badan ayaa bartay IT, balse qaar yar ayaa ka faa'iideystay sababtoo ah ma aysan aqoon **sida aqoonta loogu beddelo shaqo ama dakhli**. Cutubkan 6aad wuxuu kuu noqonayaa **isku xirka u dhexeeya barashada IT iyo nolosha dhabta ah**.

Cutubkani wuxuu ku barayaa:

- ✓ Sida xirfad IT loogu beddelo shaqo
- ✓ Sida dakhli looga helo internet
- ✓ Fursadaha freelance & online
- ✓ Sida dhalinyarada bilowga ah u bilaabi karaan

Waa Maxay Shaqo IT?

Shaqo IT waa adeeg ama hawl tiknoolajiyadeed oo:

- ✓ Lagu qabto xirfad IT
- ✓ Lagu xalliyo dhibaato
- ✓ Lagu helo dakhli

Shaqo IT waxay noqon kartaa mid xafiis ah ama online ah.

Noocyada Shaqo IT

Shaqo Xafiis (Local Jobs)

- IT Support
- Network Technician
- Data Entry
- Office IT Assistant

Shaqo Online (Remote Work)

- Web Developer
- Graphic Designer
- Content Creator
- Virtual Assistant

Internet-ka ayaa meesha ka saaray xuduudda shaqada.

Freelancing Waa Maxay?

Freelancing waa:

- ✓ Inaad shaqo u qabato dad kala duwan
- ✓ Adigoo aan ku xirnayn hal shirkad
- ✓ Lacag lagu siiyo mashruuc ama saacad

Tusaalooyin Freelance:

- ✓ Sameynta website
- ✓ Naqshad (design)
- ✓ Qorista content
- ✓ Maareynta baraha bulshada

Sida Loo Bilaabo Freelancing (Tallaabooyin)

Tallaabo 1: Dooro Adeeg

Ha isku dayin wax walba. Dooro:

- ✓ Hal xirfad
- ✓ Hal adeeg

Tallaabo 2: Samee Portfolio

- ✓ Muujin shaqooyin tusaale ah
- ✓ Xitaa haddii ay yihiin mashruucyo tababar

Tallaabo 3: Samee Profile Online

- ✓ Sharax xirfaddaada
- ✓ Ku dar shaqooyin
- ✓ Ku qor luuqad fudud

Tallaabo 4: Bilow Dalab (Apply)

- ✓ Ha sugin mid qumman
- ✓ Bilow mid yar

Fursadaha Dakhli ee IT

Fursado:

- ✓ Freelancing platforms
- ✓ Shaqo online ah
- ✓ Ganacsi dijitaal ah
- ✓ Barista dadka kale IT

IT waa xirfad kuu shaqeyn karta adigoo jooga gurigaaga.

Khaladaadka Caadiga ah ee Bilowga

- ✓ Sugidda qalab qumman
- ✓ Isbarbardhigga dadka kale
- ✓ Ka cabsashada bilowga
- ✓ Joogteyn la'aan

Xalka: bilow maanta, horumar yar samee maalin kasta.

Sheeko Dhiirrigelin ah

Cabdiraxmaan wuxuu bartay Graphic Design muddo 3 bilood ah. Shaqadiisii ugu horreysay wuxuu ka helay online, inkastoo ay ahayd lacag yar. Maanta wuxuu leeyahay macaamiil joogto ah.

Bilow yar ayaa horseeda guul weyn.

SU'AALO JAWAABO MUHIIM AH

Qor:

Xirfadda IT ee aad ku shaqeyn karto

Adeegga aad bixin karto

Qofka aad u shaqeyn karto

Xirfadda IT ee aan ku shaqeyn karo:

Web Development

Adeegga aan bixin karo:

- ✓ Sameynta website ganacsi yar
- ✓ Dayactir iyo casriyeyn website

- ✓ Sameynta bogag landing page ah

Qofka aan u shaqeyn karo:

- ✓ Ganacsato yaryar
- ✓ Dugsiyo & ururo
- ✓ Shirkado bilow ah (startups)

Qof walba wuxuu ku beddeli karaa xirfaddiisa gaarka ah.

Sideen uga duwanaan karaa dadka kale?

Maxaan si gaar ah u qaban karaa?

Waxaan uga duwanaan karaa:

- ✓ Isgaarsiin wanaagsan
- ✓ Shaqo waqtigeeda ku dhammaatay
- ✓ Fahamka baahida macaamiisha

Maxaan si gaar ah u qaban karaa?

- ✓ Bixin adeeg fudud oo la fahmi karo
- ✓ La shaqeyn macaamiisha bilowga ah
- ✓ Qiime macquul ah + tayo wanaagsan

Kala-duwanaanshuhu waa sirta guusha freelancing.

Waa maxay freelancing?

Freelancing waa in qofku adeegiisa IT u qabto macaamiil kala duwan, isagoo aan ku xirnayn hal shirkad, lacagna ku qaata mashruuc ama saacad.

Maxay shaqo online ah muhiim u tahay?

Shaqo online ah waa muhiim sababtoo ah:

- ✓ Waxay jebisaa xuduudaha dalalka
- ✓ Waxay siisaa fursad qof walba
- ✓ Waxay kuu oggolaaneysaa shaqo fog (remote)

Maxaa loo baahan yahay si freelancing loo bilaabo?

Si freelancing loo bilaabo waxaa loo baahan yahay:

- ✓ Hal xirfad IT
- ✓ Portfolio yar
- ✓ Internet & qalab
- ✓ Dulqaad iyo joogteyn

Sidee IT loogu beddelaa dakhli?

IT waxaa dakhli loogu beddelaa:

- ✓ In xirfad loo adeegsado xalinta dhibaato
- ✓ In adeeg la bixiyo
- ✓ In macaamiil la helo online ama local

Xirfad + Adeeg + Macaamiil = Dakhli

Gunaanad Waxbarasho

Layliyadan iyo su'aalahan:

- ✓ Waxay kaa caawinayaan inaad fikirka u rogto ficil
- ✓ Waxay kaa saaraan su'aasha "sidee?"
- ✓ Waxay kuu diyaarinayaan bilow dhab ah

CUTUBKA 7AAD

DHISMAHA MUSTAQBALKA IT IYO JOOGTEYN TA GUUSHA

Barashada IT iyo helidda shaqo ama dakhli waa guul weyn, balse guusha dhabta ah waa sida loo joogteeyo, loo horumariyo, loona ballaariyo aqoontaas. Dhalinyaro badan waxay ku bilaabaan xamaasad, balse way istaagaan marka ay la kulmaan caqabado cusub. Cutubkan 7aad wuxuu kuu noqonayaa hag kaa caawinaya inaad sii socoto xitaa marka ay wax adkaadaan.

Cutubkani wuxuu diiradda saaraya:

- ✓ Horumar joogto ah
- ✓ La qabsiga isbeddelka IT
- ✓ Dhismaha mustaqbal fog
- ✓ Hoggaamin iyo mas'uuliyad

IT Waa Safar, Ma Aha Meel La Gaadho

IT ma laha “waan dhammeeyay”. Teknoolojiyadda mar walba way is beddeshaa. Qofkii istaaga, wuu harayaa. Sidaas darteed:

- ✓ Baro wax cusub
- ✓ Cusboonaysii xirfaddaada
- ✓ Raac isbeddelka

Qofka maanta wax bartay, berri wuu hoggaamiyaa.

Joogteynta Guusha (Consistency)

Guul IT laguma gaaro hal mashruuc ama hal shaqo. Waxaa lagu gaaraa:

- ✓ Joogteyn
- ✓ Dulqaad
- ✓ Nidaam

Tusaale:

Qof maalin kasta 30 daqiiqo wax barta wuxuu ka horeynayaa qof hal maalin 5 saac wax barta kadibna istaaga.

Horumarinta Xirfaddaada

Siyaabo:

- ✓ Ku dar xirfado cusub
- ✓ Samee mashruucyo gaar ah
- ✓ La soco tiknoolajiyada cusub
- ✓ Ka qayb qaado bulshooyin IT

Xirfad aan la horumarin waa xirfad dabar go'eysa.

Dhismaha Sumcad & Magac (Personal Brand)

Dunida IT, magacaagu waa hantidaada.

Sida loo dhiso:

- ✓ Shaqo tayo leh
- ✓ Daacadnimo
- ✓ Isgaarsiin wanaagsan

- ✓ La wadaag aqoontaada

Dadku waxay shaqo ku siinayaan qof ay ku kalsoon yihiin.

Hoggaamin & Mas'uuliyad Dijitaal ah

Qof IT yaqaan waa inuu:

- ✓ Adeegsadaa aqoontiisa si sax ah
- ✓ Ilaaliyaa xogta & amniga
- ✓ Ka fogaa waxyeello dijitaal ah

Aqoonta IT waa awood; awooddu mas'uuliyad bay leedahay.

Sheeko Dhiirrigelin ah

Hodan waxay ku bilaabatay barashada IT si ay shaqo u hesho. Markii ay heshay, ma aysan istaagin. Waxay sii baratay xirfado cusub, waxayna maanta tahay qof tababaro bixiya.

Guushu ma aha bilowga waa sii socoshada.

SU'AALO IYO JAWAABO MUHIIM AH

Ujeeddo:

Layligani wuxuu kaa caawinayaa inaad si cad u fahanto **xirfad cusub**, sababta aad u rabto, iyo goorta aad bilaabi karto. Tani waa tallaabada ugu horreysa ee horumar joogto ah.

Ku qor buuggaaga ama warqad gaar ah:

Qor:

1. Hal xirfad cusub oo aad rabto inaad barato:

(Tusaale: Web Development, Cybersecurity, Graphic Design, Data Analysis, iwm)

2. Sababta aad u rabto xirfaddan:

- Ma shaqo ayay kuu abuuri kartaa?
- Ma dakhli online ah ayay kuu keeni kartaa?
- Ma waafaqsan tahay hibadaada ama xiisahaaga?

3. Goorta aad bilaabi karto:

- Maanta
- Usbuuca soo socda
- Bil gudaheed

Tusaale Jawaab:

- Xirfad: Web Development
- Sabab: Waxaan rabaa inaan sameeyo website-yo aan lacag ka helo
- Bilow: Usbuuca soo socda

Qorshe 6 Bilood ah (IT Development Plan)

Ujeeddo:

Layligani wuxuu kaa caawinayaa inaad ka baxdo fikir oo aad gasho **ficil la qorsheeyay**.

Bilaha 1–2:

- **Waxaad baranayso:**
 - Aasaaska xirfadda (basic concepts)
 - Erayada muhiimka ah
- **Mashruuc:**
 - Mashruuc yar (practice project)
- **Yool:**
 - Faham guud + kalsooni bilow ah

Bilaha 3–4:

- **Waxaad baranayso:**
 - Qodobada dhexe (intermediate skills)
 - Qalabka xirfadda (tools)
- **Mashruuc:**
 - Mashruuc dhab ah oo la isticmaali karo
- **Yool:**
 - Awood shaqo oo muuqata

Bilaha 5–6:

- **Waxaad baranayso:**
 - Horumarin & xirfad sare
 - Sida xirfadda looga dhigo dakhli
- **Mashruuc:**
 - Mashruuc portfolio ah
- **Yool:**

- Inaad diyaar u noqoto shaqo ama freelancing

 *Tusaale Yool:*

“6 bilood kadib, waxaan awood u yeelanayaa inaan adeeg IT bixiyo.”

Maxay joogteyntu muhiim u tahay IT?

Jawaab Hagid:

Joogteyntu waxay muhiim u tahay IT sababtoo ah teknoolojiyadda waa mid mar walba is beddesha. Qofka joogteeya barashada iyo ku celcelinta ayaa horumar sameeya, halka qofka istaaga uu dib u dhacayo.

Sidee loo horumariyaa xirfad IT?

Jawaab Hagid:

Xirfad IT waxaa lagu horumarin karaa:

- ✓ Barasho joogto ah
- ✓ Ku celcelin (practice)
- ✓ Mashruucyo sameyn
- ✓ Raacista isbeddelka cusub

Maxay personal brand muhiim u tahay?

Jawaab Hagid:

Personal brand waa sumcaddaada. Dadku waxay ku shaqaaleysiinayaan ama kuu doortaan adeeg sababtoo ah:

- ✓ Kalsooni
- ✓ Magac wanaagsan
- ✓ Tayo shaqo

Qof aan sumcad lahayn fursado badan ma helo.

Waa maxay mas'uuliyadda IT yaqaan?

Jawaab Hagid:

Mas'uuliyadda IT yaqaan waa:

- ✓ Inuu si sax ah u adeegsado aqoontiisa
- ✓ Inuu ilaaliyo xogta dadka
- ✓ Inuu ka fogaado waxyeello dijitaal ah
- ✓ Inuu bulshada wax ku biiriyo

Layliyadani waxay kaa caawinayaan:

- ✓ Inaad sii waddo horumarkaaga
- ✓ Inaad mustaqbal fog u qorshayso
- ✓ Inaad IT ka dhigto nolol & xirfad

CUTUBKA 8AAD

MUSTAQBALKALKA IT, TALOYIN DABEH, IYO FARIINTA QORAAGA

Kadib markaad fahamtay IT, dooratay xirfad, baratay, qorshaysay, una beddeshay dakhli ama fursad shaqo waxaa muhiim ah inaad aragto halka ay IT u socoto iyo sida adiga door uga yeelan karto mustaqbalkaas. Cutubkani wuxuu ku siinayaa aragti fog, talooyin waara, iyo fariin dhiirrigelin ah.

Isbeddelka Degdegga ah ee IT

Teknoolojiyadda ma istaagto:

- ✓ AI & Automation
- ✓ Cloud Computing
- ✓ Cybersecurity
- ✓ Data & Analytics

Qofka maanta wax barta, berri wuu tartami karaa. Qofka istaaga, wuu harayaa.

Cashar: Ha sugin in suuqa ku khasbo adiga is diyaari.

Sidee Dhalinyaradu uga Faa'iidayaan Karaan Mustaqbalka IT?

Fursadaha:

- ✓ Shaqo fog (Remote work)
- ✓ Freelancing caalami ah
- ✓ Ganacsi dijitaal ah
- ✓ Hal-abuur & startups

Talo:

- ✓ Ku bilow yar
- ✓ La imow xal
- ✓ Dhis xirfad qoto dheer

Anshaxa & Mas'uuliyadda Dijitaalka

Aqoonta IT waa awood. Awooddu waxay u baahan tahay:

- ✓ Daacadnimo
- ✓ Ilaalinta xogta
- ✓ Adeegsiga saxda ah
- ✓ Ixtiraamka dadka & sharciyada

IT ha noqon wax lagu waxyeelleeyo ha noqoto wax lagu horumariyo.

Talooyin Dahab ah (Golden Advice)

- Baro wax walba, ku takhasus hal xirfad
- Joogtee xitaa marka niyad jab timaado
- Samee mashruucyo dhab ah
- Dhis sumcad wanaagsan
- Baro sida loo barto (learn how to learn)

Sheeko Dhiirrigelin ah

Cabdiraxmaan wuxuu ku bilaabay IT taleefan keliya. Wuxuu bartay xirfad, sameeyay mashruucyo, dhisay sumcad, maanta wuxuu u shaqeeyaa shirkado caalami ah wuxuuna weli wax barta.

Guushu ma laha meel waxay leedahay **jid**.

SU'AALO IYO JAWAABO MUHIIM AH

Maxaad hadda bilaabi kartaa?

- Barasho online
- Ku celcelin maalinle ah
- Qorshe jadwal
- 1. **Yaa kaa caawin kara?**
- Macallin ama tababare
- Saaxiib IT yaqaan
- Bulsho online ah

Ballanqaad Qofeed (Personal Commitment)

Ujeeddo:

su'aashan waxay kaa dhigaya inaad naftaada la gasho ballan cad oo ah joogteyn iyo dadaal.

Ku qor adigoo daacad ah:

“Laga bilaabo maanta, waxaan ballanqaadayaa inaan si joogto ah u barto IT, xitaa marka ay adkaato, anigoo ujeeddadaydu tahay mustaqbal wanaagsan.”

Ardaygu wuu saxiixi karaa:

- Magac
- Taariikh

Maxay IT mustaqbal weyn u leedahay?

Jawaab Hagid:

IT mustaqbal weyn ayay leedahay sababtoo ah dunidu waxay u wareegeysaa nidaam dijitaal ah. Ganacsiga, waxbarashada, caafimaadka, iyo isgaarsiinta dhammaantood waxay ku tiirsan yihiin IT.

Sidee dhalinyaradu uga faa'iidaystaan kartaa isbeddelka IT?

Jawaab Hagid:

Dhalinyaradu waxay ka faa'iidaystaan kartaa:

- Barashada xirfado cusub
- Shaqo online ah
- Freelancing
- Ganacsi dijitaal ah

Maxay anshaxa dijitaalka muhiim u tahay?

Jawaab Hagid:

Anshaxa dijitaalka waa muhiim sababtoo ah IT waa awood. Haddii si khaldan loo adeegsado waxay keeni kartaa waxyeello, jabinta xog, iyo kalsooni darro.

Maxaa kaa dhigi kara IT yaqaan guuleysta?

Jawaab Hagid:

IT yaqaan guuleysta waa qof:

- Joogteeya barashada
- Leh anshax & daacadnimo
- Sameeya mashruucyo
- La qabsada isbeddelka
- Leh ujeeddo cad

Layliyada iyo su'aalahani waxay ardayga ka caawinayaan:

- Inuu mustaqbalkiisa qorsheeyo
- Inuu naftiisa la galo ballan dhab ah
- Inuu IT u arko mas'uuliyad iyo fursad

CUTUBKA 9AAD

IT, BULSHADA IYO DOORKA DHALINYARADA

IT kaliya ma aha xirfad lagu shaqeeyo ama dakhli lagu helo; waa qalab lagu dhiso bulsho, lagu xalliyo dhibaatooyin, laguna hormariyo waddan. Cutubkani wuxuu iftiiminayaa sida dhalinyarada IT aqoonta leh ay u noqon karaan hoggaamiyeyaal wax beddela, gaar ahaan dalalka soo koraya.

IT iyo Horumarka Bulshada

Teknoolojiyadda waxay saameyn ku leedahay:

- Waxbarashada (e-learning)
- Caafimaadka (telemedicine)
- Ganacsiga (e-commerce)
- Isgaarsiinta (social platforms)

IT waxay fududeysay helidda adeegyo hore u adkaa.

Dhalinyarada iyo Mas'uuliyadda Bulsho

Dhalinyaro IT yaqaan waa inay:

- Ka shaqeeyaan xalinta dhibaatooyinka bulshada
- Sameeyaan barnaamijyo & apps faa'iido leh
- La wadaagaan aqoonta dadka kale

Haddii aad IT taqaan, masuuliyad baa kugu jirta.

IT iyo Waddaniyad

Adeegsiga IT wuxuu:

- ✓ Ka caawin karaa horumarinta dalka
- ✓ Abuurayaa shaqooyin
- ✓ Yareynayaa tahriibka
- ✓ Kor u qaadaa sumcadda dalka

Qof IT yaqaan wuxuu dalkiisa uga adeegi karaa meel kasta oo uu joogo.

Sheeko Dhiirrigelin ah

Ayaan waxay baratay IT si ay shaqo u hesho. Markii ay shaqo heshay, waxay bilowday inay carruurta xaafaddeeda barato aasaaska computer-ka. Maanta, waxay noqotay qof bulshadeeda wax ka beddelay.

Guusha dhabta ahi waa mid la wadaago.

Talooyin ku wajahan Dhalinyarada

- IT u isticmaal wax dhisid
- Ka fogow waxyeello dijitaal ah
- Ka shaqee xalinta dhibaatooyinka bulshada
- Noqo tusaale wanaagsan

SU'AALO JWAABO MUHIIM AH

Adeeg Bulsho (IT for Community Service)

Ujeeddo:

Layligani wuxuu ardayga ka caawinayaa inuu fahmo sida **IT loogu adeegsan karo xalinta dhibaatooyinka bulshada.**

Ka fikir oo ku qor si faahfaahsan:

1. Dhibaato bulsho oo IT lagu xallin karo:

- ✓ Helitaan la'aan xog waxbarasho
- ✓ Isgaarsiin liidata
- ✓ Shaqo la'aan dhalinyaro
- ✓ Maamul xumo adeegyo

2. Xalka aad soo jeedinayso:

- ✓ Website ama app waxbarasho
- ✓ Platform isgaarsiin bulsho
- ✓ Barnaamij shaqo-abuur dijitaal ah
- ✓ Nidaam xog-ururin

3. Cidda ka faa'iidayasan doonta:

- ✓ Arday
- ✓ Macallimiin
- ✓ Dhalinyaro shaqo raadinaya
- ✓ Bulshada guud

Jawaab:

Dhibaataada: Helitaan la'aan waxbarasho online.

Xalka: Website waxbarasho Af-Soomaali ah.

Ka faa'iidayasanaya: Ardayda & dhalinyarada.

Ballan Bulsho (Community Commitment)

Ujeeddo:

Layligani wuxuu ardayga gelinayaa **mas’uuliyad bulsho** oo ku saabsan adeegsiga aqoontiisa IT.

Ku qor adigoo niyad ah:

“Waxaan ballanqaadayaa inaan aqoontayda IT u adeegsado horumarinta bulshadayda, anigoo ka fogaanaya wax kasta oo waxyeello u leh bulshada, kana shaqaynaya xal waara.”

Ardaygu wuu ku dari karaa:

- Magac
- Taariikh

Balan qaadkan wa muhiim waayo aniga hada buugan qoraayo xita way igu dhacday labo dhacdo mid ka mid ah ayaa cajiib ayaa cajiib badneyd.

Waxan xasuusta marka jamacada last semester an marayey aya waxa nalo diray assegment lagu bixinayo 20 dhibcood waxa uu ku saabsana hacking in mobile la jabiyo dhamaan xogta ku jirta wax walbo ha ahaato in la socon karo sida lambarada so wacayo wixi soo waca messeges ka codadka sawirada wax walbo oo mobile ku saabsan wala socon kara muhiimada waxay tahay markii aan soo dhameeyey hacking ka oo an keenay macalinka iga saxay ayuu labo su’aal I waydiiyey oo ahay yaa leh mobile kan an hada xogtiisa computer kala socono markas ayan ku dhahay waxa is ka leh yar an saaxiibo nahay, su’aasha laabad waxa uu I dhahay ma ogyahay haa ayaan dhahay macalinkana in badan waxa iga amin san yahay arday kuwa ugu dan oo aan

dhībka badney inta badana maqnashahooda badan yahay sida
owgeed 20 marks wan qaaatey jamacada waxay ahayd
university of somalia(uniso) halkan waxan ka salaamaya
ustaadkeyga eng mohamed adam isak Ph.D.

Mida kalo cajiibka badneyd waxay tahay .

Waxa jirtay qof aan mudo 3 sano iyo bar isnaqaaney waliba intii
waxbarashada i socotay gabar lagu magacabo sumayo ayada
waxay baraneysay jamacad kale oo isku jamamacad ma ahayn
wxan ahayn asxaab isku fiican wanag isku barteen wax badan
oo jamacada ku saabsan isla wadaagi jirney ha noqoto
assegments la isku diro iwm madama ayada cafimaad
baraneysay kadib waxa dhacay in maalin iso wacday kadiba
xoga sheekeysanay ayey waxay dhahday qof ban isa so
dagaalney marka waxan raba in aad facebook geda ii jabiso
hackin igu sameyso ana wagaaas farta ka xirnaa marka waxa
igu so dhacday dhibatada ka imaan karta iyo in IT hadi ad barato
in qof ka lagu dhibateenin oo adan u adegsan wax yaabaha xun
sida in aad bulshada ku dhibaateeyso.

Aniga waxan dhahay taas ma sameyn karo ee adiga isku day in
aad qofkas siyaabo kale oga argoosato kana sii fiican inaad iska
cafiso almuhin yaan qoraalka kugu dheereynin qofkii sidas ku
kala tagney ila hada war iskuma mahayno mudo sanado laga
jooga.

Muhiimada qoraalkan waxa ay tahay balanta aad qaadeyso in
aadan ka bixin balantaas oo ah in aadan bulshada ku
dhibaateynin

adigo ka fogaanaya wax kasta oo waxyeello u leh bulshada, kana shaqaynaya xal waara.

Sidee IT u hormarin kartaa bulsho?

Jawaab Hagrid:

IT waxay horumarin kartaa bulsho iyadoo fududeysa:

- Waxbarasho
- Isgaarsiin
- Adeegyo
- Shaqo-abuur

Maxay dhalinyaradu door muhiim ah ugu leeyihiin IT?

Jawaab Hagrid:

Dhalinyaradu waa kuwa ugu dhaqsaha badan ee la qabsada teknoolojiyadda, lehna fikir cusub iyo tamar. Sidaas darteed waxay noqdaan hormuud isbeddel.

Sidee IT loogu adeegsadaa waddaniyad?

Jawaab Hagrid:

IT waxaa waddaniyad loogu adeegsadaa:

- ✓ Horumarinta adeegyada dalka
- ✓ Abuurista shaqooyin
- ✓ Kor u qaadidda sumcadda dalka
- ✓ Ka shaqaynta xalalka dhibaatooyinka qaranka

Maxay mas'uuliyadda bulsho muhiim u tahay?

Jawaab Hagrid:

Mas'uuliyadda bulsho waa muhiim sababtoo ah aqoonta IT waa

awood. Haddii aan si masuuliyad leh loo adeegsan, waxay keeni kartaa dhibaato iyo kalsooni darro.

Layliyada iyo su'aalahani waxay ardayga baraan:

- ✓ Inuu IT u arko adeeg bulsho
- ✓ Inuu noqdo qof wax ku biiriya
- ✓ Inuu mas'uuliyad qaato

IT waa xirfad; adeeg bulsho ayaana ka qiimo badan.

CUTUBKA 10AAD

DARDARAN, TALOYIN DHEERAAD AH, IYO WADDOOYINKA XIGA

Cutubkani wuxuu u adeegayaa sidii hanuun dhammeystiran oo akhristaha ka caawinaya inuu wax kasta oo uu bartay IT u rogo ficiil, u qorsheeyo mustaqbalkiisa, isla markaana isku diyaariyo guul. Waa fariin qoraaga iyo hagitaan loogu talagalay dhalinyarada.

Dardaaran Qoraaga

HUSSEIN ABDIRAHMAN, B.S. wuxuu dhalinyarada u leeyahay Ha ku ekaanin inaad barato xirfad IT oo keliya, balse ku dadaal inaad fahanto sida loo isticmaalo aqoontaas si bulsho iyo shaqsi midba u faa'iideysto. Joogteynta, dulqaadka, iyo mas'uuliyadda ayaa kuu horseedaya guul waarta.”

Talooyin Dheeraad Ah

1. **Baro si joogto ah:**

- ✓ Teknoolojiyadda waa mid si degdeg ah isu beddesha, barashada joogtadana waa furaha guusha.

2. **Mashruucyo dhis:**

- ✓ Samee mashruucyo yaryar oo dhab ah, si aad u aragto natijada aqoontaada.

3. **Isku xir bulsho IT yaqaan ah:**

- ✓ Ka qayb qaado kooxo online ah, webinars, iyo forums.

4. **Dhiso sumcad (Personal Brand):**

- ✓ Daacadnimo, tayo shaqo, iyo la wadaagista aqoonta ayaa sumcad dhisaya.

5. **Ku shaqee xalinta dhibaatooyinka:**

- ✓ Adeegso IT si bulshada loogu faa'iideeyo, ma aha kaliya dakhli.

6. **Diyaar u noqo isbeddelka:**

- ✓ Mar walba baro farsamooyin cusub, software, iyo teknoolojiyad cusub.

10.4 Layliyo Waxbarasho

Layli 1: Yoolka Mustaqbalka

Qor:

- Hal sano kadib, maxaad doonaysaa inaad gaarto IT?

- Maxaad hadda bilaabi kartaa si yoolkaa loo gaaro?
- Maxaa kaa caawin kara inaad gaarto yoolkaas?

Layli 2: Tallaabooyinka Joogtada ah

Qor qorshe 3–6 bilood ah:

- Waxa aad baranayso
- Mashruucyada aad sameynayso
- Dadka ama ilaha kaa caawin kara
- Sida aad u qiimeyn doonto horumarkaaga

10.5 Su'aalo Qiimeyn Ah

1. Maxay muhiim u tahay inaad joogteyso barashada IT?
2. Sidee mashruucyo dhab ah ku caawin karaan xirfaddaada?
3. Maxay muhiim u tahay inaad dhisto sumcad (Personal Brand)?
4. Sidee IT loogu adeegaa bulshada iyo waddaniyadda?
5. Maxay masuuliyaddu muhiim ugu tahay qof IT yaqaan ah?

SU'AALO JAWAABO MUHIIM AH

Hal sano kadib, maxaad doonaysaa inaad gaarto IT?

- Tusaale: “Hal sano kadib, waxaan rabaa inaan noqdo web developer xirfad leh oo mashruucyo yaryar samayn kara.”

1. Maxaad hadda bilaabi kartaa si yoolkaa loo gaaro?

- Tusaale: “Waxaan bilaabi karaa barashada HTML, CSS, iyo JavaScript, iyo sameynta website-yo yaryar oo tijaabo ah.”

2. Maxaa kaa caawin kara inaad gaarto yoolkaas?

- Tusaale:
 - Koorso online ah (Coursera, Udemy)
 - Tababar ama mentor
 - Saaxiibo IT yaqaan ah
 - Jadwal maalinle ah oo waxbarasho

Tusaale Jawaab oo Buugga ku qori karo akhristaha:

Hal sano kadib: Web Developer xirfad leh

Hadda bilaabi karaa: Barashada HTML & CSS

Ka caawinaya: Mentor & koorso online ah

Tallaabooyinka Joogtada ah (3–6 Bilood Plan)

Ujeeddo:

Layligani wuxuu kaa caawinayaa inaad barashada IT u rogto qorshe cad oo ficil ah.

Ku qor qorshe 3–6 bilood ah:

Bilaha 1–2: Aasaaska

- Waxaad baranayso: HTML, CSS, basic programming
 - Mashruucyada: Website yar oo shaqsi ah ama blog
 - Dadka/ilaha kaa caawin kara: Koorso online, videos, mentor
 - Qiimeyn: Dhis website tijaabo ah oo aad isticmaasho
- Bilaha 3–4: Xirfad Dhexdhexaad

- Waxaad baranayso: JavaScript, responsive design, version control (Git)
- Mashruucyada: Website interactive ama mashruuc portfolio
- Dadka/ilaha kaa caawin kara: Bulsho online ah (forums, Discord, Facebook groups)
- Qiimeyn: Mashruuc live ah oo saaxiibada ama mentor arko

Bilaha 5–6: Horumarin & Portfolio

- Waxaad baranayso: Frameworks (React, Vue), UX/UI design, deployment
- Mashruucyada: Portfolio rasmi ah oo u diyaarsan shaqo ama freelancing
- Dadka/ilaha kaa caawin kara: Mentor, tababaro, shaqo dhisid freelance

- Qiimeyn: Portfolio dhameystiran oo live ah & feedback laga helo

Tusaale Jawaab oo Buugga ku qori karo akhristaha:

Bil 1–2: HTML & CSS → Website tijaabo

Bil 3–4: JavaScript → Website interactive

Bil 5–6: React & UX → Portfolio live ah oo freelancing u diyaarsan

1. Maxay muhiim u tahay inaad joogteyso barashada IT?

IT waa cilmi si degdeg ah isu beddelaya. Tiknoolajiyo cusub, barnaamijyo, iyo habab amni ayaa mar walba soo baxaya. Haddii aadan joogteyn barashada:

- Xirfaddaadu way duugoobi kartaa
- Shaqooyinka casriga ah waad ka haraysaa
- Tartanka suuqa shaqada ayaad ku guuldarreysan kartaa

Joogteynta barashada waxay kaa dhigtaa qof la jaanqaadi kara isbeddelka dunida.

2. Sidee mashruucyo dhab ah ku caawin karaan xirfaddaada?

Mashruucyada dhabta ah:

- Waxay ku barayaan xalinta dhibaatooyinka dhabta ah
- Waxay kuu dhisaan khibrad la taaban karo (experience)
- Waxay kuu noqdaan portfolio aad ku tusiso shaqo-bixiyeyaasha
- Waxay kor u qaadaan kalsoonidaada xirfadeed

Qof mashruucyo sameeyay wuu ka horreeyaa qof kaliya wax bartay.

3. Maxay muhiim u tahay inaad dhisto sumcad (Personal Brand)?

Personal Brand-ku waa sida dadka kuugu yaqaannaan xirfad ahaan:

- Waxay kaa caawisaa inaad shaqo ama fursado hesho
 - Waxay ku muujisaa aqoontaada iyo kartidaada
 - Waxay kaa dhigtaa qof lagu kalsoonaan karo
- Qof IT ah oo sumcad fiican leh mar walba waa la raadiyaa.

4. Sidee IT loogu adeegaa bulshada iyo waddaniyadda?

IT waxaa lagu adeegaa:

- Horumarinta adeegyada dadweynaha (e-government)
- Waxbarashada casriga ah (online learning)
- Caafimaadka (systems, records, telemedicine)
- Amniga xogta iyo wacyigelinta bulshada

Qof IT yaqaan ah wuxuu dalkiisa ku caawin karaa aqoon, hal-abuur, iyo adeeg daacad ah.

5. Maxay masuuliyaddu muhiim ugu tahay qof IT yaqaan ah?

Qof IT ah wuxuu gacanta ku hayaa:

- Xog dad iyo shirkado
- Nidaamyo muhiim ah
- Amni iyo sir (privacy)

Masuuliyad la'aan waxay keeni kartaa:

- Xog daadasho
- Dhibaato bulsho ama dhaqaale
- Kalsoonida oo lunta

Masuuliyaddu waa tiirka ugu weyn ee xirfadda IT.

FARIINTA UGU WEYN:

IT waa furaha mustaqbalkaaga. Aqoon, qorshe, joogteyn, iyo mas'uuliyad waxaad ku gaari kartaa guul nololeed, shaqo, iyo adeeg bulsho. Ha sugin, bilow maanta, hana ka baqin inaad qalad sameyso qof kasta oo bilaaba ayaa horumar samaynaya.

GUNAANADKA BUUGGA

Buuggan wuxuu dhalinyarada tusayaa jidka ay IT uga dhigi karaan aqoon, xirfad, iyo fursad nololeed. Waxaad ka baratay:

- ✓ Fahamka IT:
 - Qaybaha IT: Hardware, Software, Network, Data
 - Farqiga u dhexeeya IT iyo Computer Science
- ✓ Xirfadaha mustaqbalka:
 - Sida loo doorto xirfad IT
 - Sida xirfadda loogu beddelo shaqo, freelancing, iyo mashruucyo
 - Barashada joogtada ah iyo horumarinta xirfadaha
- ✓ Qorsheyn iyo Joogteyn:
 - Sida loo sameeyo jadwal barasho
 - Sida loo qiimeeyo horumarkaaga
 - Yoolal muddo-gaaban iyo muddo-dheer ah

- ✓ Mas'uuliyadda iyo Anshaxa:
 - IT waa awood; waa in si masuuliyad leh loo isticmaalaa
 - Adeegsiga aqoonta IT waa in loogu faa'iideeyo naftaada iyo bulshada
 - Dhisida sumcad (personal brand) iyo anshax dijitaal
- ✓ Mustaqbalka & Bulshada:
 - Sida dhalinyarada IT yaqaan ay u noqon karaan hoggaamiyeyaal
 - Adeegsiga IT si loo horumariyo bulsho iyo waddan
 - Fursadaha shaqo, ganacsi, iyo horumarinta xirfadaha